

Light Reading

Sebteembar-Oktoobar 2020

Qaboow ku joog Xagaaga Soo socda, Beer Geed Dayrtaan

Kadib marka aad soo maro xagaa kale oo kulul, waxaa laga yaabaa inaad ka fakarayso qaabab aad qaboow ku heli karto xagaaga soo socda. Beerista geedo meel xeeladaysan laga beero waxay kaa caawin karaan qaboojinta gurigaaga oo sare u qaadaan waxtarka tamarta.

Geedaha waxay leeyihiin faa'idooyin badan. Waxay yareeyaan daadadka roobka, waxay kor u qaadaan tayada hawada, waxay kor u qaadaan qiimaha guryaha, waxayna hormarin karaan caafimaadka. Geedaha qaboobaha—midka caleenta rida xiliga qaboobaha—lagu abuuray dhinaca galbeedka ee gurigaaga wuxuu har siin karaa gurigaaga kuleelaha oo u ogolaado in falaaraha qoraxda ku diiriyo qaboobaha. Faa'idada harka iyo qaboojinta geedka waxay korodhaa isaga oo sii weynaanaayo. Guri leh tamar ku filan oo ay ka beeran yihiin geedo 25 fiit dheeraaroodu yahay oo hoos siinaaya dhanka galbeed ee guriga ayaa ka qaboow kana raaxo badan guryaha kale xiliga xagaaga, geeduhuna waxay yarayn karaan qarashaadka ku baxa qaboojinta guryaha xiliga xagaaga.

Si aad hoos uga hesho geedaha deegaankeena, galbeedka ayaa ugu wanaagsan. Xaqiiji inaad ku beerto geedaha meelo ka fog fiilooyinka korontada aadna wacdo 8-1-1 kahor intaadan qodin. Inaad geedo ku beerto aagaaga beerista ayaa u baahan oggolaansho bilaash ah oo aad kasoo qaadato Seattle Department of Transportation (Waaxda Gaadiidka ee Seattle). Si aad u hesho xogta oggolaanshaha iyo liiska geedaha xajmi ahaan ku habboon inaad ku beerto meelaha u dhaw fiilooyinka korontada, ka fiiri Buuga Tasmada oonleenka ah ee Seattle Department of Transportationay u samaysay Street Tree Manual (Geedaha Wadada), ood ka helayso webseetkaan:

seattle.gov/trees/planting-and-care/street-trees.

Dhaqaalayaasha uu saameeyay COVID-19? Waan ku caawin karnaa.

City Light waxay bixisaa ilo badan oo looga caawinaayo macaamiisha ay saamaynta dhaqaale kasoo gaartay aafada COVID-19. Qofna kama jarayno korontada sabab la xariirta inuusan dhiibin lacagta intii lagu jiray waqtigaan adag, waxaana haynaa dookhyo lacag bixin iyo barnaamijyo caawimaad siinaaya dadka u baahan.

Haddii dakhligaagu cariiri galay, fadlan nalasoo xariir si aan kuula dajino qorshe qarash bixin adoo wacaaya (206) 684-3000 ama iimeel u diraa 24/7 ciwaanka seattle.gov/utilities/about-us/email-question.

Hel liiska buuxa ee barnaamijyada caawimaada bilka biyaha iyo korontada iyo khayraadka kale ee bulshada oo aad ka helayso <https://powerlines.seattle.gov/2020/03/18/covid-19-resources>.

Iska Ilaali Wicitaanka Tuugada

City Light marnaba taleefoonka kama soo waceyso lacag si ay kaaga dalbato bixin degdega ah. Haddii uu kula soo xiriir qof kugu hanjabaayo inuu kaa jarayo adeegaaga haddii aadan bixin isla markaas, waxay iskudayayaan inay ku qiyaamaan. Jooji wada sheekaysiga isla markaba kadibna naga soo wac (206) 684-3000 ama booqo seattle.gov/light/endscams si aad u soo wargelisid isku dayga qiyaanada. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo seattle.gov/light/endscams.

Xili Dayreedkaan, Ka faa'iidayso Tilmaamahaan

Ayadoo maalmuhu sii yaraanayaan, habaynkuna sii qaboobaayo, nugaylkeena ayaa ah inaan kuleel raadsano, inaan daarno foornooyinka, aana raadsano xawaajiga bocor hindiga! Marka dakhligaagu kooban yahay, waxaa haboon inaad raadsato qaabab cusub aad ku hesho diirnaanta adoon isku badin qarashka korontada. Halkaan waxaad ka helayaa dhawr tilmaamood oo kaa caawinaaya inaad lacagta dhaqaalaysato xili sanadeedkaan.

- Si xeeladaysan u adeegso nalalka. Nalalka miiska la dul suro iyo dookhyada nalalka kale ee shaqada ayaa loo adeegsan karaa shaqo gaar ah marka loo baahdo, waxayna meesha ka saari karaan nalalka guud. Nalalka banaanka iyo kuwa amaanka ayaa laga dhigi karaa kuwo koronto cunkoodu yaryahay ayadoo lagu xiraayo dareemayaal ama waqti kooban oo ay shidmaan, si ay u shidnaadaan kaliya marka loo baahan yahay.
- Raadi oo yaree duleelada. Ma jiro wax carqalad galin kara meel raaxo leh oo ka badan duleel, hawada duleelka ka imaanaysana waxay masuul ka noqon kartaa saddex meelood meel kamid ah qarashaadka kuleelka ee gurigaaga! Iskuday inaad qiimayn il marin ah ku samayso gurigaaga, adoo raadinaaya nal ka imaanaaya meelo furan taasoo ah cadaynta hawo guriga soo galaysa. Farsamooyinka qarashka yar waxaa kamid noqon kara inaad hawo xakameeyo ku xirto daaqadaha iyo albaabada, adoo ku xiraaya jilaafyada caaga ah ee daaqada, kuna xiraaya jilaas hawada xira geesaha daaqada gudaha guriga.
- U adeegso biyaha kulul si caqliyaysan. Waxaa jeclaan kartaa inaad biyo kulul ku qubaysato, laakiin ma ogtahay kululaynta biyuhu inay tahay waxa labaad ee ugu koronto cun badan guriga kadib qalabka kululaynta iyo qaboojinta? Joogtee qubayska shaawarka muddada kooban iskuna day inaad soo iibsato madaxyada shaawarka ee aan korontada badan cunin.
- Diyaarso nidaamkaaga kululaynta. Hadda ayaa la joogaa waqtigii aad tuuri lahayd rakooyinka salka ama aad badeli lahayd miirayaasha nidaamkaaga kululeeyaha. Nidaamyada kulayliyaha ee sida wacan loo dhawro wuxuu u shaqeeyaa si tashiil badan wayna yartahay inay jabaan. Ha u ogaan in agabka guriga, daahyada iyo alaabaha kale ee guriga inay ka hor istaagaan nidaamkaaga kulayliyaha inuu dabka gaarsiiyo meesha loo baahan yahay.

Ka Shaqeynayo Aaga Xaafadaada

Kooxda [Seattle City Light](#) waxay joogaan xaafadahaan, ayagoo kashaqaynaaya bixinta adeegyo waxtar leh:

- Arroyo/South Arbor Heights: gelinta fiilooyin dhulka hoostiisa, saqafyada iyo nalalka wadooyinka ee lagu badelaayo kaabayaal aan dhamaaneen;
- Chinatown-International District: U badalida fadhiyada nalka ee hoos ka xiran oo lagu badelaayo nalalka LED meelo badan oo wadooyinka isdul mara ku yaalaan;
- Bartamaha Seattle: waxaan rakibaynaa kaydanka dhulka hoostiisa si aan u kordhino sugnaanshaha nidaamka korontada bartamaha magaalada;
- Aaga Adeegga: waxaan badelaynaa baalayaasha korontada ee duqoobay dhammaan aaga adeegga korontada xarunta si aan kor ugu qaadno badqabka iyo isku halaynta korontada.
- Southwest Seattle: kor u qaadista xariirada u dhaxeeya xarumaha dhawrka ah ee shirkada anagoo badalayna fiilooyinka kor mara ee faybar obtiga.

Kan waa liis aan dhamaystirneen. Haddii aad rabto sharaxaad booqo seattle.gov/light/atwork si aad hesho qariiradeena aadna waxbadan uga barato mashaariicda gaarka ah.

Tallada badqabka ee goobta

“Markaad ka shaqaynayso banaanka u dhaw gurigaaga, xasuusnoow inaad raadiso aadna iska hubiso fiilooyinka. Ka fogee dhammaan jaranjarooyinka, agabka saqafka iyo qalabka geedaha lagu jaro laymanka korontada kor marta si aad uga dheeraato xaalad khatar ah. Haddii aad qorshaynayso inaad shaqo ka qabato meel u dhaw laynka korontada, ka wac City Light lambarka 684-3000 kadibna codso in muddo kooban korontada la jaro si badqabkaaga loo dhawro”

Seattle City Light

700 Fifth Avenue

PO Box 34023

Seattle, WA 98124-4023

Su'aalo, faallooyin ama Soojeedin? Wac **(206) 684-3000**.

Tafatiraha: Tony White, tony.white@seattle.gov

Wargeyska wuxuu ku diyaarsanyahay Isbaanish, Vietnamese, Shiineys, Soomaali, Tagalog and Korean oonlaynka or wac **(206) 684-3000**.